Macluumaad ku socda imtixaangelayaasha oo ku saabsan gelida imtixaannada afnoorwiijiga, imtixaanka cilmiga bulshada iyo imtixaanka muwaadinimada

Imaanshaha: Waa inaad waqtiga imtixaanka ku timaado. Haddii aad timaado kadib marka imtixaanku bilaabmo, ma gelaysid imtixaanka. Macluumaad ku saabsan waqtiga iyo goobta aad ku gelayso imtixaanka ka eeg warqada ay kuu soo dirtay goobta imtixaanku.

Aqoonsi: Waa inaad tusto aqoonsi shaqaynaya oo aad saxeexdo liistada imtixaangelayaasha marka aad timaado goobta imtixaanka. Aqoonsiga la oggolyahey waa:

- Baasaaboor shaqaynaya
- Kaadhka bangiga ee noorwiijiga oo leh sawir
- Liisan noorwiiji ah - asal iyo nuqul
- Kaardhka aqoonsiga ee boostada ee la soo saarey wixii ka dambeeyay 1 Abriil 2003
- Taysarada qaranka ee laga soo saaray aagga EØS
- Caddaynta socdaalka qaxootiga iyo baasaboorka ajinebiga
- Kaadhka degganaanshaha ee ajinebiga
- Caddaynta magangelyodoonka oo leh magac iyo goobta dhalashada

Magac: Marka aad saxeexayso liistada imtixaangelayaasha, waa inaad hubiso in magaca, cinwaanka iyo lambarka aqoonsiga si sax ah loo qorey. Marka aad gasho bogga imtixaanka, waa inaad hubiso in magaca, cinwaanka iyo lambarka aqoonsiga si sax ah uga muuqdaan shaashada.

Risiidh: Haddii aad kharashka imtixaanka ku bixisay warqada lacagbixinta (faktura) ama goobta imtixaanka, waa inaad soo qaadato risiidhka marka aad gelayso imtixaanka. Waxa goobta imtixaanka lagugu weydiin karaa inaad tusto risiidhkaaga. Sidoo kale goobta imtixaanka waxa lagugu weydiin karaa risiidhkaaga haddii aad ku bixisey kaadhka bangiga ama Vipps.

Bukaan: Haddii aad bukooto, waa inaad soo dirto ama keento caddayn dhakhtar ama fasax xannuun goobta imtixaanka ugu dambeyn todoba (7) cisho kadib taariikhda imtixaanka. Markaa lacag la'aan ayaad imtixaanka ku gelaysaa mar dambe.

Waxyaalaha wax lagu qoro Ma isticmaali kartid warqad ama qalin kuu gaar ah, laakiin waxaad weydiisan kartaa in lagu siiyo qalin iyo warqad haddii aad rabto. Waa inaad dhiibtaa waraaqaha kahor inta aadan qolka ka bixin.

Moobiil: Waa inaad gebi ahaanba bakhtiiso/demiso taleefanka gacanta oo aad iska fogeyso inta imtixaanku socdo. Kuma haysan kartid kan jeebkaaga ama meeshaad fadhido. Haddii imtixaangale lagu qabto moobil inta imtixaanka lagu jiro, waxaa loo arkayaa isku day qish.

Qalab caawimo: Ma isticmaali kartid wax qalab caawimo ah inta imtixaanka lagu jiro. Taas waxa looga jeedaa in aanad isticmaali karin netka ama dukumentiyo lagu kaydiyey kombuyuutarka. Lama xidhiidhi kartid cid aan ka aheyn ilaalada ama maamulaha imtixaanka inta imtixaanka

lagu jiro. Isticmaalka netka ama dukumentiyo lagu kaydiyey kombuyuutarka waxa loo arkayaa qish.

Labo jeer gelid Lama ogola in la qaato qeyb imtixaan isku mid ah marar badan, isla muddada imtixaanka. Haddii aad qaadato qeyb imtixaan isku mid ah marar badan isla muddada imtixaanka, waxa keliya oo la oggolanayaa natiijada imtixaanka ugu horreeyay.

Qish: Ma isticmaali kartid wax qalab caawimo ah inta lagu jiro imtixaanka. Isticmaalka qalab caawimo ama iskuday, waxa sidaas loo arkayaa sida qish.

Tusaalooyinka qishka waxey noqon karaan:

- isticmaalka qalabka elektiroonigga ah, sida telifoonka gacanta, saacadda (smartklokke) iyo muraayadaha indhaha (smartbriller)
- isticmaalka bogagga netka ama barnaamijyada kombiyuutarka oo aan ka ahayn siistamka imtixaanka.
- in qoraal lagu dhejiyo meesha jawaabaha ee imtixaanka qorista (tan waxaa si otomaatig ah loogu diiwaangeliyaa sida qish)
- ka soo minguurin dhammaan ama qeyb ka mid ah jawaabta dadka kale (tusaale ahaan soo xadis)
- isticmaal aqoonsi beenabuur ah
- isticmaal qaamuus ama qoraallo la sitay
- la xidhiidh dadka kale ee aan ka aheyn shaqaalaha goobta imtixaanka inta imtixaanka lagu jiro

Qish, ama iskuday qish wuxuu keeni karaa:

- in goobta lagaa saaro
- inaan lagu siin caddayn qeybaha imtixaannada ee afnoorwiijiga ee aad qaadatey muddadan imtixaannada (tani waxey khuseysaa dhammaan heerarka, A1 – C1)
- inaad sugto ilaa hal sanno, kahor si aad u geli karto markale imtixaannada
- waa inaad bixiso fiiga imtixaanka marka aad ma dambe gelayso imtixaanka

Qishka waxaa la ogaan karaa inta lagu jiro imtixaanka, kadib imtixaanka ama waqtiga sixidda jawaabaha.

Been abuurista shahaadada: Been abuurista shahaadada waxa loo arkaa been abuuris dukumenti oo waxa loo gudbinyaa booliiska.

Shahaadad: Xarunta imtixaanku waxey u dirtaa shahaadada imtixaanka cinwaanka ku yaal liiska imtixaangelayaasha. Waa inaad ogeysiisaa goobta imtixaanka haddii aad yeelato cinwaan cusub.

Xaqa dacwadda: Waxaad xaq u leedahay inaad ka dacwooto natiijada imtixaanka qaybta qoraalka ah (imtixaanka afnoorwiijiga heerka A1 - B2). Xilliga kama dambaysta ah ee dacwadda waa saddex toddobaad ka dib markii imtixaanka la saxey.

Waxaad xaq u leedahay inaad ka dacwooto natiijada labada qeybood ee imtixaanka afnoorwiijiga ee C1 - heerka tacliinta sare (qeybta imtixaanka ee ku saabsn fahanka dhageysiga iyo wada hadalka afka

iyo qeyta fahanka akhrinta iyo xidhiidhka afka ah). Xilliga kama dambaysta ah ee dacwadda waa saddex toddobaad kadib markii imtixaanka la saxey.

Waxaad ka dacwoon kartaa khaladaadka rasmiga ah ee ku saabsan qaadista imtixaanka ee cilmiga bulshada iyo imtixaanka muwaadinimada, iyo weliba khaladaadka rasmiga ah ee ku saabsan qaadista dhammaan imtixaannada afnoorwiijiga (heerarka A1 – B2 iyo heerka C-1).
Waa inaad dacwadaada khaladaadka rasmiga u gudbiso goobta imtixaanka. Xilliga kama dambaysta ah ee dacwaddu waa saddex toddobaad kadib markii imtixaanka la galay. Waxaad soo gudbin kartaa cabasho qoraal ah, ama waa inaad saxeexdo inaad ku cabaneyso af ahaan. Ka eeg macluumaadka ku saabsan xaqa cabashadda bogga Kompetanse Norge.

Kahor inta aanuu imtixaanku bilaabmin, waxaad fursad u haysataa inaad weydiiso su'aalo wax ku ool ah. Haddii aadan fahmin su’aalaha qeybta imtixaanka ee qoraalka ah, waxaad weydiin kartaa maamulaha imtixaanka.